

## Warbixin ku socota waalidka iskoollada

Ka hor intii aan iskoollada Norway la xirin carruurta xannaanooyinka carruurta iyo iskoollada dhigta laguma arag wax cudur faafa ah oo la kala qaadayo. Marka dadka waaweyn la barbardhigo way yar yihiin carruurta cudurka qaadday Norway iyo adduunka intiisa kale labadaba. Ilaa iyo hadda waxay u muuqataa in ay aad u yar tahay khatarta ay carruurta iyo dhallinyaradu ugu jiraan in ay aad ula xanuunsadaan fayraska korona. Khatartaas oo ka yar midda xanuunnada kale ee hawa-mareenka sida tusaale ahaan hargabka.

### Waa ammaan in ay carruurta iskoollada aadaan

Si tartiib-tartiib ah ayaa hadda iskoollada loo furayaa, waxaan qaadnay tillaabooyin dhawr ah oo lagu xaddidayo kala qaadista. Muddada foodda nagu soo haysana waxaan si dheeri ah uga taxaddari doonaa in aan si wanaagsan uga hor tagno kala qaadista cudurrada. Taas oo ku xiran in aan kulligeen dadaal muujinno oo aan u hoggaansanno talooyinka cusub ee ka hortagga kala qaadista cudurrada. Iskoollada waxaan si gaar ah isha ugu hayn doonaa:

- In gacmaha la dhaqdo oo ardayda la baro in ay gacmaha si wanaagsan u dhaqdaan
- In ay nadaafaddu wanaagsanaato
- qalabka oo si joogto ah loo dhaqo, tusaale ahaan kombiyuutarrada gacanta
- in badan in ardayda bannaanka loo saaro, xataa xisadaha caadiga ah iyo SFO
- in dadka wax loo dhigayo ama isu imaanaya ay ka koobnaadaan koox yar
- in masaafo fiican laysu jirsado

Weli waan ka taxaddaraynaa ammaanka ardayda iyo in ay bey'adda iskoollada ahaato mid wanaagsan. Dadka iskoollada ka shaqeeya oo dhan ayaa la soconaya in ay xaaladda ardaydu wanaagsan tahay.

### Haddii aysan fiicnayn xaaladda caafimaad ee ilmahaagu

Iskoollada iyo SFO ha imaannina haddii ay ilmahaaga ka muuqdaan calaamado jirro, xataa haddii ay yihiin calaamado fudud. Aad ayay muhiim u tahay in ay ilmuhu habeen iyo maalin guriga sii joogaan marka ay calaamadu ka baabba'aan kaddib. Haddii dad kale oo guriga jooga lagu arkay calaamado xanuun hawa-mareenka ka haya ama laga helay cudurka fayraska korona, markaas ilmaha iskoollada uma soo raacaysaan.

Haddii uu ilmuhu iskoollada ku xanuunsado, annaga ayaa waalidka la soo xiriirayna. Ilmaha waa in sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah iskoollada looga kaxeeyaa ama ay ayagu guriga u aadaan.

### Looma baahna in ay waalidku iskoollada soo galaan

Waxaan isku daynaa in aan carruurta bannaanka idinkaga qabanno, annaga oo jecel in aysan waalidku iskoollada iyo barta dharka laysaga beddelo midna soo gelin.

In gacmaha layska dhaqo waa muhiim guriga iyo iskoollada labadaba. Gacmaha iska dhaqa ka hor intaydnaan iskoollada imaan, iyo isla marka aad guriga tagtaan ba.

Waxaa wanaagsan in aysan carruurta dhex gelin carruur kale oo badan xilliga ay firaaqada yihiin, oo weliba markaas na ay bannaanka ku ciyaaraan.

### **Geynta iyo ka soo qaadista iskoolka**

Haddii ay ardaydu raacaan baska iskoolka waa in ay masafo fiican dadka u jirsadaan, inta ay baska sugayaan iyo marka ay gudihisa ku jiraan ba. Waxaa iyana isla sidaas ah haddii ay ardaydu doon ama gaadiid kale iskoolka u raacaan. Geynta iyo ka soo qaadista iskoolka iyo raacidda gaadiidka dadweynaha ha layska daayo haddii ay suurtaggal tahay.